

## Iska Ilaali khiyaamada iyo been abuurka laysku dhaco xiliga lagu jiro caabuqa baahsan ee COVID-19

**Dembiilayaashu waxay u isticmaalayaan caabuqa baahsan ee COVID-19 inay been abuur ku dhacaan dadweynaha – ha noqon dulmane.**

COVID-19, cudurka uu keenay fayraska cusub ee coronavirus, hadda wuxuu si rasmi ah u noqday mid caalamka oo dhan ku baahay. Dembiilayaal caalamka oo dhan ku kala nool ayaa masiibadan u isticmaalaya inay dadweynaha been abuur ku dhacaan, iyagoo abbaaraya kooxaha nugul si ay uga faa'iidaystaan cudurkan baahsan. Action Fraud, adeega qaran ee UK ee ka warbixinta khiyaamada ayaa ku warbixiyey in khiyaamooyinka la xiriirta coronavirus ay kor u kaceen 400% bisha Maarso 2020 gudaheedii.

Booliiska iyo laamaha kale ee dawladda ayaa si wadajir ah uga wada shaqaynaya inay faafiyaan macluumaadka ku saabsan been abuur ku dhacida, islamarkaana hubinaya in dadweynuhu ay ka feejigan yihiin khiyaamooyinkaas.

Adeegga Dacwad-ku-soo-oogidda Sare ayaa soo bandhigay talooyinka soo socda:

**Jooji:** In la qaato daqiiqad oo laga fekero ka hor inta aadan lacagtaada ama macluumaadkaaga bixin waxay kugu ilaalin kartaa badbaado.

**Iska caabi:** Ma noqon kartaa wax aan sax ahayn? Waa caadi in la diido, lagu qanci waayo ama la iska indhatiro wixii codsiyao ah. Dembiilayaasha oo keliya ayaa isku deyi doona inay ku dedejiyaan ama ku argagax geliyaan.

**Ilaali:** Isla markiiba la xiriir bangigaaga haddii aad aaminsan tahay in lagugu dhacay been abuur, kuna wargeli arinta Action Fraud.

Waxaanu wakhti ku bixinay in aanu akhrino warbixinno kala duwan oo been abuur wax lagu dhacay, waxaanuna kuu samaynay liis ah waxyaalo ay tahay inaad u fiirsato.

\*Fadllan ogow in aan liisku marnaba ahayn mid koobaya wax walba, dembiilayaashuna waxay heli karaan dariiqyo kale oo ay ku beegsadaan shakhsiyaadka, sidaa darteed mar walba feejignoow.

- Baaritaan Fayraska ah: Qalabka Fayraska lagu baaro waxaa keliya oo bixiya NHS (Adeegga Caafimaadka ee Qaranka) gudaha UK.
- Tallaalo/Daaweyn: Xilligan hadda ah ma jiraan tallaalo iyo daaweyn loo hayo COVID-19.
- Waxyaalo aan Asal ahayn: Waxaa dhacday kor u kac aad u weyn oo ah alaabo aad loo qaaliyeyey ama aan asal ahayn oo layskaga ilaaliyo coronavirus. Kuwaa waxaa ka mid ah dareerayaal bakteeriyada dila, maaskaro (gafuur-gashi) iwm.
- U keenid Adeeg/Daawo: Dembiilayaashu waxay beegsanayaan dadka nugul iyagoo albaabadooda ugu tagaya, una soo bandhigaya inay u soo sameeyaan adeegooda ama u keenaan daawo.
- Adeegyo Nadaafaddeed: Bixin adeegyo nadaafaddeed si looga hor tago faafidda fayraska.
- Emails/fariimo qoraal oo si khiyaamo ah macluumaad loogu raadinayo: Iska ilaali fariimaha qoraalka ah ee kugu khiyaamaynaya inaad furto lifaaqyo waxyeelo leh kuwaas oo keeni kara in khiyaamo sameeyayaashu helaan macluumaadkaaga gaarka ah.

Email-lada soo socda ayay Action Fraud ogaadeen:

1. Khiyaamo sameeyayaashu waxay iska dhigaan inay ka socdaan koox daraasaad samaynaysa oo isku metelaya Xarunta Xakamaynta iyo Ka hortaga Cudurka (Centre for Disease Control and Prevention, CDC) iyo Hay'adda Caafimaadka Aduunka (World Health Organisation, WHO). Waxay sheeganayaan inay dulmanaha siinayaan liis ah dadka caabuqu ku dhacay ee agagaarkooda.
2. Khiyaamo sameeyayaashu waxay bixiyaan maqaallo ku saabsan fayraska dillaacay iyagoo bixinaya isku xire kuu jihaynaya bog internet oo shirkad been abuur ah, halkaan oo dulmanaha lagu booriyo inuu gujiyo ku biiridda (subscribe) wargeys maalinle ah si uu u helo xoggo cusub oo dheeraad ah.
3. Khiyaamo sameeyayaashu waxay dirayaan talobixin qorsheyaal maalgashi iyo ganacsi iyagoo dadka ku boorinaya inay ka faa'iidaystaan hoos u dhaca dhaqaale ee xilliga coronavirus.
4. Khiyaamo sameeyayaashu waxay iska dhigayaan inay ka socdaan HMRC (Hay'adda Dakhliga iyo Kastamadda) iyagoo dulmanayaasha u soo bandhigaya cashuur u celin, isla markaana ku jihaynaya bog internet oo been abuur ah si ay uga qaataan faahfaahintooda shakhsi iyo ta dhaqaale.

Haddii adiga ama qof aad taqaan lala beegsaday dhac been abuur ah, waa inaad arinta u gudbisaa bogga internet-ka ee Action Fraud ee [www.actionfraud.police.uk/](http://www.actionfraud.police.uk/) ama adiga oo ka wacaya 0300 123 2040.

Wixii talobixin iyo macluumaad ah ee la xiriira sida loo hubiyo in arini noqon karto dhacid been abuur ah, booqo: [www.citizensadvice.org.uk/consumer/scams/check-if-something-might-be-a-scam/](http://www.citizensadvice.org.uk/consumer/scams/check-if-something-might-be-a-scam/).

\*Turjumaaddan waxaa si is xilqaan ah u diyaariyey koodayada wanaagsan ee turjubaanada madaxa banaan\*

Somali: Ahmed Adan